

Saamaynta Qaaxada (TB)

Caalam ahaan

Qaaxadu waxay ku socotaa inay noqoto muskilad caalam oo aad u weeyn. Hay'adda Caafimaadka Adduunku (WHO) waxay qiyaaastay in saddex meelood oo meel dadweeynahaa adduunka ay sadhaysay. Qaaxadu. Waxaa kale oo jira 9.2 malyuun oo arrimood oo cusub oo qaaxada cudurka fidin kartaa ah oo la aqoonsday isla markaasna sabata in ka badan 1.5 malyuun oo dhimashaa ah sannad kasta.

Qowmiyad ahaan

Labaatankii sannadood ee la soo dhaafay, tirada arrimaha qaaxada firi-fircooni ee laga soo sheegay Karada way yaraatay. Si kastaba ha ahaatee, 2004 tii, Karada waxaa laga soo sheegay 1,613 oo qaaxada firi-fircooni ah.

Degaankan ahaan

Isku cel-celin, Middlesex-London waxaa jira 10 arrimood oo cusub oo ah qaaxada firi-fircooni sannad kasta. Qaaxada daawawa u adkaysta, iyadana waxaa la caddeyey in ay jirto nawaaxigeenna.

Waa maxay Qaaxadu?

Jeermis li yiraahado Mycobacterium tuberculosis ayaa keenna qaaxada. Inta badan waxay abbaartaa sanbabada, laakiin waxay kaloo saddaysaa xubnaha kale ee jidhka.

Sidee u fiddaa qaaxadu?

Qaaxadu waxay ku faafftaa hawada marka qof qaba qaaxada saddaysani qufoco, hindhis, ama hadlo isla markaasna qof kale neef ahaan u qaato oo ay gasho sanbabkiisa/keeda

Maxay tahay qaaxada aan firi-fircooni?

Caalam ahaan

Neefsashada jeermiska qaaxada inta badan kuma bukoodo qofku waayo nidaamka cudur iska difaaca jidhka aaya awooda inuu xakameeyo jirada. Jeermiski wuu noolaanayaa laakiin kuma firi-fircoonaanasyo jidhka qofka. Sidaas waxaa loo yaqaannaa qaaxada aan firi-fircooniyan loona yaqoanno qaaxada sadhaysan ama qaaxada qarsoon. Dadka leh qaaxada qarsooni ma bukaan isla markaasna kuma fidin karaan dadka kale.

Maxay tahay qaaxada firi-fircooni?

Haddii nidaamaka cudur iska difaacista qofku uusan joogin karay korriinka jeermiska qaaxada, waxaa ku kobcaysa qaaxada firi-fircooni. Calaamaddaha lagu garto waxaa ku jiri kara:

- Qufac
- soo quficid dhiig am xaaiko
- xummadi amma qandho
- dhidid habeenkii
- miisaankaaga oo yaraada
- daal

Qaaxada firi-fircooni waxaa loo aqoonsaday inay sadhaysantahay haddii ay saamayo sambabada iyo marrinada hawada. Qaaxadu waxay u dhowdahay inaysan sadhaysnayen haddii ay saamayo jidhka intiisa kale.

Qaaxada aan firi-fircooniyan ni ma u gudbi kartaa cudurka qaaxada firi-fircooni?

Guudahaan, si uu sadhoobo, qofku waa inuu la yeeshaa xirir badan qof qaba qaaxada

Yaa qaadi kara cudurka qaaxada firi-fircooni?

Caalam ahaan

Dadka soo socda aaya aad ugu dhow inay qaadaan cudurka qaaxada firi-fircooni: dadka aad u yar yar iyo dadka waaweeyn, dadka ay la soo deristay walaac fara badan iyo dadka hawigalka nidaamkooda cudur iska difaacistu uu hooseeyo cudurro kale awgood.

Arrimaha qaaxada firi-fircooni oo dhan waxaa si buuxda u baara unugga caafimaadka. Ashkhaasta ay aad uga muuqato waxaa lagu dhiiirrii gelinayaa inay iska qaadaan tijaabada qaaxada ee maqaaraka.

Maxay tijahabada qaaxada ee maqaarka?

Xoogaa dareere ah oo yar, oo ah nafaqada tuberculin ayaa lagu durayaa maqaarka dhudhunkaaga hoostiisa. Laba ilaa saddex casho ka dib, waa inaad soo noqtoos si loo eego dhudhunkaagii haddii uu falgal dhacayna waa la qiyasayaa. Wixii ka korreya baaxadda qiyas fal gal la ogyahay ayaa loo aqoonsadaa muuqasho qaaxada firi-fircooni.

Ka hubinta jidhka waa maxay macneheedu?

Falgal la hubo inta badan macneheedu waxa weeye waxaa ku saamaysay jeermiska qaaxada waqtii noloshaada ka mid ah. Dhakhtar ayaa samayn doono tijaaboyin dheeraad ah oo ay ka mid yihiin raajada feeraha iyo saamiyo candsuufeed, si uu hubiyo inaadan qabin qaaxada firi-fircooni. Qaaxada firi-fircooni iyo tan aan firi-fircooniyniba waxay muujiyaa falgal hubaal ah.

Qaaxada waa laga hortegi karaa, waa lala tacaali karaa waana la daweeyn karaa.

Haa, dadka qaba qaaxada aan firi-fircooni haddii nidaamkooda cudur iska difaacista uusan kai joojin karin jeermiska inuu koro. Waxaa jirta ku doowaan 5% khatar ah oo soo bixitaan qaaxada firi-fircooni 2da sano ee ugu horraya ee sadhaysanta. Taas ka dib, waxaa jirta 5% fursad ah oo qofku ku qaadi karo qaaxada firi-fircooni inta ka hadhay noloshiisa.

Daaweynta

Int abadan, waxaa jira antibiyotiks lagu daaweyyo qaaxada firi-fircooni isla markaasna iska hortaagta qaaxada firi-fircooni inay fiddo. Daawooyinka ugu caansan ee lagula dagaalamo qaaxada waxay yhiin Isoniazid (INH), Pyrazinamide (PZA), Rifampin iyo Ethambutol. Haddii aad qabtid qaaxada aan firi-fircoonian, dhakhtaaarkaagu wuxuu kaloo kugula talin kara daawo la yirrahdo prophylaxis, muddo 9 ilaa 12 bilood ah oo yaraynaysa suuerto galnimada in qaaxada aan firi-fircoonian u gudubto tan firi-fircooni.

Daawooyinka qaaxada oo dhhammi waa bilaash Oontaariyo gudeheeda. Dhakhtarkaaga ayaa kaaga dalbi kara daawooyinkan unugga caafimaadka.


Jeermiska Yareeyaa Cudur Iska Difaaca Qofka (HIV) & qaaxada (TB) isaa saamayntooda

HIV waa jeernis dacifiya nidaamaka cudur iska difaaca qofka isla markaasna aad u adkeeyaa la dagaallanka saamaynta qaaxada. Addiun weeynaha, qaaxadu waa sababita ugu weeyn ee dhimashada dadka qaba HIV. Sidaas daraeed, dadka qaba qaaxada iyo HIV waxay u baahanyihin in la baro cudurdaas loogana daweeyo sida ugu dhakhsaha badan.

Qaaxada u adkaysata dawada

Qaaxada u adkaysata daawadu ma aqbasho inta badan daawoonyinka lagula tacaalo. Marka qofka qaba qaaxada firi-fircooni uu u qaadan waayo daawada si habboon, jeermiska qaaxada ayaa u adkaysista daawooyinka. Taasi waxay keentaa in qofkaasi ku faatiyo qaaxada firi-fircooni dadka kale. Waxaa jira danaajoojin kala duwan ee qaaxada u adkaysata daawada oo ka jirta addiun weeynaha. Qaarkood aad bay u adagtaahay in laal tacaalo. Sidaas daraeed, waxaa muhiim ah in daawada qaaxada loo qaato sida loogu talagatalay.

Qaaxadu Maaha Cudur Hore oo Keliya



Wixii macluumaad dheeraad ah la xirir:

Kooxda llaalisa Cudurada Faafa
Unugga Caafimaadka Middlesex-
London

519-663-5317 qolka 2330.

Illo Warreed

Iskaashiga Jooji Qaaxada

www.stoptb.org

Hay'adda Caafimaadka Adduunka
www.who.int/en/

Hay'adda Caafimaadka
Dadweeynaha Kanada
www.publichealth.gc.ca

Jimciyadda Sanbabada Kanada
www.lung.ca

Gudida Aydhiska ee London
www.aidslondon.com

Middlesex-London Health Unit
50 King St., London, ON N6A 5L7
tel: (519) 663 - 5317 • fax: (519) 663 - 9581
health@mlhu.on.ca

Strathroy Office - Kenwick Mall
51 Front St. E., Strathroy ON N7G 1Y5
tel: (519) 245 - 3230 • fax: (519) 245 - 4772

Xaqiiqda